



## WAREYSIYADA DHAXALKA NOOL (LIVING LEGACIES): SOO QODISTA SHEEKOYINKA BULSHADA

Iyadoo Northwest Folklife indhaha ku heyso xuskeena 50 guurada ku beegan 2021, waxanu isku deyeynaa inaannu dadka shaqadeena suurto galka ka dhiga udub dhexaad uga dhigno dabaaldegga. Si loo sharfo Halyeeyada Nool ee inaga mid ah, waxannu 2020 si gaar ah ugu aqoosannay in kor loogu qaado codka halyeeyada maalin kasta xambaarsan dhaqanka gobolkeena. Waxaannu kugu yeereynaa inaad nagu soo biirto si xusuus reeb loogu sameeyo iyo sare u qaadidda sheekooyinka aan hore loo maqal ee bulshadaada si loo xafido looguna gudbiyo jiilka xiga.

Qalabka Northwest Folklife ee *Dhaxalkaasi Nool* wuxuu dadka siinayaa tusaalooyin iyo ilo suurto gelinaya soo ururinta iyo qeybinta sheekooyinka, xusuusyada, iyo soo jireennada qoyskaaga, dariskaaga, iyo bulsho-weynta kale.

Qalabkan waxa ka mida:

**1. DULMAR GUUD OO AH SIDA LOO MARTI-GELIYO WAREYSIYADA HALYEYADA NOOL**

**2. Registro de recursos y sugerencias de documentación**

**3. LIISKA SU'AALOYIN TUSAALA AH OOD WAX KU BILAABI KARTO**



**DULMAR GUUD OO AH SIDA LOO MARTI-GELIYO  
WAREYSIYADA HALYEYADA NOOL**

## **Maxey qabashada sheekooyinkeena muhiim u tahay?**

Dhanqanku wuxuu ku dhex nool yahay 'Folklife' - taasi oo ah nolosha maalin walba iyo curinta qalbiga ka soo go'da een dhammaanteen wadaagno iyo u gudbinteeda jiilka xiga. Sababtani waa midda sheekooyinkaada iyo sheekooyinka dadka kale ee kugu hareereysan ay u yihiin kuwo gooni ah, keyd aad u qiime badan. *Dhaxalkaasi Nool* waxey nagu xiraan asalkeena, isu keenaan jiilalka, isla markaana na siiya asaaska mustaqbalkeena. Ururinta, dhowrista iyo qeybinta sheekooyinkaasi, waxanu gacan ka geysan karaan xoojinta isku xirnaanta dhaqamada hodanka ka dhiga nolosheena iskuna haya bulshadeena. Kor u qaadidda codka kuwa Dhaqankeena Xambaarsan ee inaga mida, waxey la macno tahay xoojinta nafteena iyo mustaqbalka sheekooyin dhaqamadeedka "Folklife" bulshadeena.

## **Qof walba waxa uu hayaa sheeko uu sheego.**

Kuwa dhaqanka xambaarsan waxa laga heli karaa meel kasta — meelaha bulshadu ku kulmaan, iskuullada, goobaha ganacsiga, iyo qoyska gudihiisa. Saaxiibbada, kabiirrada, dariska, qaraabada, macallimiinta, iyo kuwa kale waxey hayaan sheekooyin xambaarsan dhaqan ee gudbin kara sheeko maalmeedka bulshada. Haddii muwduucu uu yahay dhaqan iyo caqiidad, cunto iyo maqaayado, muusig iyo ciyaaro, sheekooyin iyo heeso, ama xusuuso kaliya oo maalmihii tagey, codadkaasi bulshada waxey xambaarsan yihiin Dhaxalka Nool ee mudan in la sharfo.

## **Sidee baan u qaadaa wareysigeyga?**

1. Qaad sawirro iyo fiidiyow.
2. Qoro haddallada qaar.
3. Isticmaal qalabka codka lagu duubo ama app.

Ma u baahnid qalab gaar ah si aad u martigeliso Wareysiyada Dhaxalka Nool. Badanaa Makrofoonada smartphones waxa lagu dhex dhisay masawir, fiidiyow, iyo awood maqal, waxana kaloo jira aabab ama apps faree ah, oo si sahlan loo soo degsan karo si ay kaaga caawiyaan qabashada, tifaftiridda, iyo wadaagidda sheekooyinkaaga.

## ILAHA SIDA WAX LOO DUUBO IYO TUSAALOYIN DIIWAANGELINTA

### **Ka hor wareysiga**

La xiriiir kuwa Dhaqankaaga Xambaarsan una sheeg inaad dooneyso ama rabto inaad wax ka qorto ama ka duubto iyo inaad dadka la wadaagto Dhaxalkooda Nool. Ka dib kula ballan meel iyo waqti aad ku wareysato.

Dooro meel raaxo ah, oo la ilaaliyo marka aad martigelineyso wareysiga, kana fog buuqa. Xittaa goob la ilaaliyey waxey lahaan karaan (dhawaqa daqiiqadda saacadda, farijideer is daaraya, shimbiraha bannaanka, iwm.). Hubi iney jirto meel la fariisto, sagxad wax lagu dul qori karo, iyo deegaan aamusan si aad wax u duubto adigoo lagu qasin.

Samee xoogaa baaritaan horu dhac ah si aad u urursato warbixinno gadaal ka dhac ah. Wax badan ood ka ogaato kuwa Dhaqankaaga Xambaarsan, waxey ku sahleysaa inaad la timaado su'aalo gooni ah iyo jiho toosan oo ku saabsan wareysiga. Meelaha baaritaannada kuu sahli kara waxa ka mida internet, xubnaha qoyska ama laabreeriga.

Wareysi diyaar-garow ah la samee saaxiib ama xubin qoyska ka mida si aad uga hortagto wax kasta oo ka iman kara isticmaalka qalabka iyo si aad u dareento kalsooni iney wax kasta sidii loogu talo galay kugu shaqeyn doonaa.

Imaw adigoo diyaarsan. Hubi inaad la timaado warqad iyo qalin, qalab aad si fiican batteriga ugu soo buuxisay (ama ha ahaato telefoonkaaga ama qalab kale), iyo kaarka xusuusta ee qalabkaaga (ama kaarka bannaanka (external hard drive) si aad si buuxda aad wareysiga ugu qaaddo. Hab kastood ood u doorato inaad wax u duubto, iska hubi inaad si sahal ah u isticmaali karto!

### **Waqtiga Wareysiga**

Dhig qalabka ama telefoonka aad wax ku duubeysto meel sahal ah uu wax ka qaban karo. Halka ugu mudan waxey tahay inaad dhigto makroofanka meel 6 ilaa 10 inches ka fog qofka hadlaya afkiisa.

Samee duubis tijaabo si aad u hubiso halka aad dhigeysyo iney si fiican codkaaga iyo su'aalaha iyo jawaabaha u duubi karaan. Samee wixii hagaajin loo baahan yahay sida halka aad dhigeysyo iyo sida ugu wanaagsan ee codku u qaban karo inta aadan bilaabin wareysiga.

Dhageysyo haddii ay jiri karaan fursado wanaagsan oo su'aalo daba socod ah ama waxyaabo aadan fahmin. Hubi inaad weysiiso iyo faahfaahin.

Adeegso muuqaallo mar kasta oo ay suurto gal tahay. Sawirro qadiimi ah, albuunka sawirrada qoyska, buugaagta wax lagu xafido, qoraallo, shahaaddada dhalashada, dhaxal hore, shaqooyin farshaxan, iyo

xusuusyo caawini kara in dib loo milicsado waayadii hore isla markaana xiise gelin kara kala duwaanasha fiidiyowga.

Qoro oo indhaha ku hay waqtiyada loogu talo galay su'aalaha, jawaabaha, ama fursadaha gaarka ah inta aad howsha ku jirto. Tani waxey kaa caawineysaa inaad si sahal ah usoo heli karto oraahyada ka dib wareysiga.

## Wareysiga ka dib

Qoraallo kookooban ka sii sameyso inta wareysiga maskaxdaada ku cusub yahay taasi oo ay ku jirto sida ay wax kuula muuqdeen, ama goob joog, murtida, iyo fikradaha kale ee dib-u-raacis keeni kara.

Soo koob nurxurka good ee duubista qoraalna ka samee, si kalmad kalmad ah, xigasho kasta ood isticmaali karto iyo dul maryo aad dib dambe u jaleeci kartid.

Hubi in feylasheena aad ku qorto una xafiddo si habaysan. Waxan kugula talineynaa inaad ku keydiso wareysiyada Google Drive, Dropbox, ama si kale oo ay ka mid tahay meelaha onleenka ee wax lagu lagu xafido ee lacag la'aant ah si aaney kaaga lumin, meelo fog ood si sahal ah ugala soo bixi karto goor dambe.

La socod ku saabsan sida ugu wanaagsan oo loo xafidi karo loona sharfi karo sheekooyinkooda la samee kuwa Xambaarsan Dhaqankaaga. Weydii haddii ay jiraan qeybo ka mida wareysiga oo ay jeclaan lahaayeen iney gooni u ahaato, isla markaana hubi inaad hesho fasax ama rukhsad inta aadan dadweynaha la wadaagin wareysiga.

\*ka eeg liiska ilaha hoose tilmaamo sida loo tifaftiro codadka iyo fiidiyowyada.

## LIISKA SU'AALOYIN TUSAALE AH OOD WAX KU BILAABI KARTO

### Su'aalaha Suurto-galka ah

*Ma jiraan su'aalo sax ama qalad ah oo qof la weydiiyo, laakinse haddii aad u baahan tahay kuwo ku caawini kara inaad howsha ku bilowdo, ka dooro su'aalaha qeyb kasta ee kuwa hoose ka muuqda. Waxaad ku bilaabi kartaa inaad weysiiso qofka Dhaqankaaga Xambaarsan magacooda iyo haddii ay jiraan sheekooyin ku saabsan asalkooda.*

1. Ka hadalka Waayadii tagay: Goorma iyo halkee baad ku dhalatay? Sided baad adiga, familkaaga, ama asalkaagii ku timaadeen Wuqooyiga Galbeed. Sidee buu ahaa socdaalkaasi? Maxey ahaayeen dhacdooyinkii taariikhiga ahaa ee saameynta ku yeeshay qoyskaaga iyo bulshadaada?

2. Isku Xirka Dadka iyo Goobaha: Kuwee bay ahaayeen dadkii waaweynaa iyo kabiirradii muhiimka u ahaa korriimadaadii, iyo maxey ahaayeen farsamooyinkii ama casharradii ay ku bareen? Halkee bay ahaayeen goobihii kulamada ee bulshadaadu maxeyse muhiim u ahaayeen?

3. Wadaagidda iyo U-Dabaaldeggidda Dhaqamada: Maxey ahaayeen cuntooyinkooda, farsamadooda, heesahooda, sheekooyinkooda, ama dhaqammadooda ay jiiilba-jiiil usoo gudbiyeen qoyskaaga? Sharraxaad ka bixi farshaxanka, dhaqanka, ama caadooyinkii qoyska midka aad aadka ugu faanto isticmaalkooda.

4. Gudbinta Dhaxalka: Maxey muhiim u tahay in la gudbiyo dhaqankaaga, sheekooyinkaaga iyo caadooyinkaaga? Sidee baad u gudbin kartaa caadooyinkaaga? Sidee baad u aragtaa sida caadooyinkaasi isu taraan ama isu beddelaan? Maxaad jeclaan laheyd in jiiilka mustaqbalka ogaadaan?

---

## La Wadaag Sheekadaada Northwest Folklife's Living Legacies

Iyadoo Northwest Folklife ku dhiseyso xuska 50 guurada waqtiyadii tagay, waa ADIGA dhaxalkii sheekooyinkaaga iyo bulshadaada kuwa aan dooneyno inaan ku saleyno korna u qaadno!

### LA WADAAG BULSHO WEYNTA PACIFIC NORTHWEST:

1. **Geli** dulmarka guud ee sheekooyinkaaga, sawirradaada, iyo duubitaannadii: Instagram, Facebook, Twitter, YouTube or Soundcloud
  - a. *\*Fiiro:* Haddaad gelisay sheekadaada YouTube, fadlan cinwaan uga dhig fiidiyowgaaga sidantan “NWFL Living Legacies: \_\_\_\_\_ (Cinwaankaaga)”
  - b. *\*Fiiro:* Fadlan hubi in boostigaagu ahaado “public” si aan u awoodno inaannu sheekadaadu u daawanno dadkana ula wadaagno.
2. Isticmaal Hashtag **#NWFLlivinglegacies** isla markaana taag garee Northwest Folklife (@nwfolklife)
3. Waxanu qeyb ka mida sheekooyinkaaga kula wadaagi doonnaa baraha bulshadeena!

### LA WADAAG NORTHWEST FOLKLIFE:

Ma dooneysaa inaad u soo gudbiso oraah ama dul-mar ka mida sheekadaada Keydka Northwest Folklife? Buuxi warqaddan [HERE](#). Sheekooyinka lagu soo qabtay cod iyo fiidiyow, fadlan soo gudbi xoogaa ka mida ama cutub dherarkoodu gaarayo 5 ilaa10 daqiiqadood.

---

### Additional Resources

- [Best Free Voice Recording Apps for smartphones](#)
- [Best Practices for Making Audio Recordings](#)
- [Video editing software suggestions and examples](#)
- [Wa Na Wari's Central District Oral History Studio](#)
- [Oral History Release Forms](#)

### **Inspiration & Examples**

- [Shelf Life Community Stories Project](#)
- [Many Paths, Many Voices: Oral Histories from the UW Special Collections](#)
- [Principles of Fieldwork and Archiving](#)
- [The Third Thirty: A Community Oral History Project](#)

### **Adapted from**

- [Washington State Parks Folk & Traditional Arts Program](#)
- ["Telling Our Stories Toolkit", Oregon Folklife Network, 2018](#)
- [The Smithsonian Folklife and Oral History Interviewing Guide](#)